

Mushaharka ugu Yar ee Ontario



- Waa in lagu siiyaa ugu yaraan mushaharka ugu yar ee \$17.20 saacad kasta oo aad shaqeyso.
- Ardayda da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay leeyihiin mushahar hoose oo ah \$16.20.
- Si kastaba ha ahaatee, iyadoo ku xiran shaqadaada, waxaa laga yaabaa inaad helin mushaharka ugu yar. Shaqooyinka qaarkood sida shaqaalaha beeraleyda, shaqaalaha IT-ga iyo kormeerayaasha dhismaha ayaan ilaalinayn sharciyada mushaharka ugu yar.

	Mushaharka ugu Yar ee dadka waaweyn	Ardayda ka yar 18 sano jir
Oktoobar 1, 2023	\$16.55	\$15.60
Oktoobar 1, 2024	\$17.20	\$16.20

Sideen isu ilaalin karaa haddaan si sax ah la ii siin lacagta aan xaqqa u leeyahay?

- Haddii maamulahaagu uu ku siinayo wax ka yar mushaharka ugu yar, ku billow inaad xafido diiwaankaaga qoraal ah dhammaan taariikhaha iyo saacadaha la shaqeyay iyo mushaharka lagu siiyay.
- Uruuri cadaymaha ugu badan ee suurtoogalka ah. Tan waxa ku jiri kara heshiiskaaga shaqo, jadwal, sawiro iyo fariimo qoraal ah.
- Isku day inaad kaydiso haddii ay dhacdo inaad lumiso gelitaanka taleefankaaga, xisaabtaada iimaylka ama gelitaanka goobtaada shaqada. Daabac nuqullo warqad ah ama qaado sawirro haddii loo baahdo.
- Naga soo wac Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha 416-531-0778 haddii aan lagu siinin mushaharka ugu yar si aan u wada shaqayno si aan u soo ceshano waxa lagugu leeyahay.

Waa maxay sababta mushaharka ugu yar ee Ontaariyo u kordho?

- Shaqaalaha Ontaariyo waxay u dagaalameen - wayna ku guuleysteen - sharci 2014-kii kaas oo ku xiray kordhinta mushaharka ugu yar ee Ontario iyo kororka qiimaha noloshayada. Kharashyadaas waxaa ka mid ah waxyaabaha sida cuntada, kirada, dharka iyo gaadiidka.
- Sharcigan 2014 ka hor, waxaa u fududaatay dawlada Ontario inay hakiso mushaharkayaga ugu yar. Tusaale ahaan, dawladda Konserfatifka waxay xayirtay mushaharka ugu yar ee \$6.85 muddo 9 sano ah.
- Marka mushaharkayaga la xayiro laakiin qiimuhu kordho, waxay la mid tahay sida uu madaxdeenu u gooyo mushaharkayaga. Taasi waa sababta ku guuleysiga sharcigan ay u tahay guul muhiim u ah shaqaale badan.
- Laakin \$17.20 wali kuma filna. Shaqaaluhu waxay mudan yihiin wax badan. Dawlada Ontario waxay u baahan tahay inay sare u qaaddo mushaharka ugu yar si qofna aanu uga shaqayn mushaharka saboolnimada.

La cusbooneysiisay Oktoobar 2024